

MASUULIYADAHA IYO XAQUUQDA WAALIDKA AAN CARUURTA HAYN

Noncustodial Parent's Rights and Responsibilities

Waaxda Taageerada Ilmaha (DCS):

1. Waxay dhidibtaa oo meel-marisaa amarrada taageerada ilmahal iyo xilka looleeyahay taagerada caafimaadka.
2. Waxay dib-ugu-fiirsataa amarrada taageerada ilmaha bal hadday dhici karto inay jiraan wax ka beddel.
3. Qaabbishaa, diiwaan-galisaa, qaybisaa biximaha taageerada ilmaha iyada oo loo marayo Diiwaanka Taageerada ee Dawladda Washington (WSSR)

Waalidka aan Ilmaha Hayn

Adigu waxad tahay waalid aan ilmaha (carruurta) haynin. Waalidka aan carruurta hayni waa aabbaha dhalay cunugga, ama aabbo korsasho loo qiray ama loo xukamay, hooyada dhashay cunugga, ama hooyada loo xukumay ama korisa oo ah midka ay qasabka ku tahay inuu siyo caawinaada dhaqaalaha carruurta ku tiirsan. Sharciyada gobolka iyo kuwa federaalkaayaana ku qasbaya waajibaadkan..

Bixinta Taageero Ilmo

Badanaaba, adigu waa inaad bixisa masaariifta carruurta. Ka dib markay DCS ku siiso ogeysiis ay kaaga rabto inaad bixiso taagerada ilmaha, DCS **kama qaadanayso dayn** koontadaada xisaabta wax kasta oo lacag bixino ah oo loo diro wax aan ahayn WSSR, maxkamadda qabaa'ilka ama hay'ada taageerada ilmaha, ama maxkamadda gobol kale ama hay'ada taageerada ilmaha. DCS kama qaadanayso dayn koontadaada xisaabta lacagta sida tooska ah loogu bixiyay qaybta kale ee amarka taageerada aan ka ahayn lacagta laga bixiyay hay'ad loogu talagalay dheefta kutiirsanaanta, sida Maamulka Dammaanada Bulshada. Wasaarada Shaqadda, ama Wasaarada Arimaha Halyeey hore ee loogu talagalay ujeeddooyin waajibka taageerada ilmaha.

1. U sheeg xafiiska DCS isla markaaba haddii uu gobol kale ama hay'ad taageero ilmo qabiil ama maxkamad qabiil ama gobol kale ay warsato waalidka aan ilmaha haynin inuu iyaga siyo lacag taageero ilmo.
2. Ha u dirin lacag bixinta qof aan ka ahayn ciawaanka loogu talagalay WSSR ee hoosta ku qoran haddii aanay DCS kuu soo shegin si qoraal ah in la xiray keeskaaga mooyee.

Dhammaantiina waa inaad taageertan lacag bixinta ee loogu tala galay Diiwaanka Taageerada ee Gobolka Washington (WSSR). Wuxaad ku bixin kartaa mid ka mid ah hababkan soo-socda:

1. Taageerada jeegga shaqada amarrada taageerada inta ugu badan ayaa u oggol in ay DCS u ururiso oo ay ka jarto taageerada jeegga shaqada ama ay weydiisataan in lacag bixin la sameeyo ayada oo loo marayo WSSR. Haddii amarkaaku uu farayo in sidaas ay DCS sameyso, DCS waxay isku dayayaan inay taageerada ka gooyaan jeegga shaqada.
2. Jeegga shaqsiga, "money order"-ka, jeeg diiwaan gashan, ama jeegga qasnajiga. U dir dhammaan lacagaha jeega diiwaan gashan iyo jeegga shaqsiga Cinwaanka ah:

WASHINGTON STATE SUPPORT REGISTRY
PO BOX 45868
OLYMPIA WA 98504-5868

3. Wareejin Lacageed oo Elektaroonik ah (EFT). Dariiqada EFT waxay suurta-galisaa in si otomaatik ah lacagta taageerada looga jaro bil kasta acoonada jeegga ama keydinta bil kasta. Si aad xog dheeraad ah aad u heshid waxaad wacdaa 800-468-7422.
4. Dariiqada "Internet"ka. Ku bixinta dariiqada Internetku waxay suurta-galisaa in lacag-bixinta taageero laga jaro bil kasta acoonka jeegga ama keydinta. Si aad macluumaa dheeraad ah uga heshid, booqo bogga barta internetka ee DCS ee ah <https://secureaccess.wa.gov>.
5. Kaararka Deynta iyo Lacag Bixinta. Hadaad rabto xog dheeraad ah, waxaad kabooqataa barta DCS halkan <https://www.dshs.wa.gov/esa/division-child-support/creditdebit-card-payments>.

Haddii uu bangigaadu soo celiyo mid ka mid ah jeegaggaa ama uu aqbali waayo lacag kala bixidda EFT ama midda internetka, sababta oo ah xisaabtaada oo aanay ku jirin lacag ku filan, DCS waxay lacag bixinta mustaqbalka kaaga aqbali karaan kaliya lacag caddaan ah, "money order", jeegga qasnajiga, jeeg diiwaan gashan, ama ka jaridda jeega shaqada.

Ku soo rid lambarka dacwadaada iyo akoon lambarka **IN _____** dhammaan biximaha iyo warqadaha la is-dhaafsaday

DCS **ma qaddarinayso koontadaada** lacag bixinada loo diray qof kasta marka laga reebi WSSR. Wakaalad taageero ilmo ama maxkamada beebleed, ama wakaaladaha kale ee taageerta carruurta iyo maxkamad kale ee gobolka ah. **DCS ma qaddarinayso koontadaada lacagta si toos ah loo siiyay cid kale ee taageerada amarka.**

Haddii aad haysato sabab sharci ah oo aadan caawinaad dhaqaale u siin karin carruurtaada ama DCS ay si qalad ah u bilowday keyskaada, si dhaqso leh ugu wargali DCS.

Haddii DCS kugu wargeliso in ayuu celinayno isku ururka taageeradaada waajibka ah, waajibkaaga wuxuu noqon karaan mid la aruuriyo mustaqbalka. DCS waxay kugu wargelin doontaa kahor inta aysan tallaabadaan qaadan.

Haddii lagugu xiray ama lagugu xukumay in ka badan lix bilood xabsi, jeel, ama xarun asluub, amarkaaga taakuleynta carruurta ayaa waxaa laga yaabaa in si ku meelgaar ah loo yareeyo (loo dhimo) ilaa \$10 bil kasta oo loogu talagalay amar taakulayn carruur kasta. Adiga, waalidka carruurta haya, ama DCS ayaa codsan kara lacag dhimis. Haddii lacag dhimista lagu dabaqi karo kiiskaaga, ayaa waxaad ogeysiis ka heli doontaa DCS oo lagu sharxayo shuruudaha lacag dhimista iyo xaqa uu qof kasta u leeyahay in uu codsado dhageysi haddii aysan isku raacin. Qaddarka ayaa lagu kordhin doonnaa 50% ee amarka taakulaynta bisha afaraad ka-dib marka lagu soo daayo, wuxunna kordhi doonnaa ilaa 100% ee qaddarka asalka hal sano ka-dib marka lagu soo daayo.

Xilka Taageerada Caafimaad

Haddii amarka taageeradaada uu ku farayo in aad bixisid caymiska carruurtaada. DCS waxay qaadysaa tallaabo ay ku meelmarinayso xilka ku saaran. Haddii amarka taageeraada uu ku farayo in aad bixisid taageero caafimaad oo lacag caddaan ah. DCS waxay caddayn doontaa khadarka lacagta lagaa doonayo in aad bixisid waxayna kaa qaadysaa lacagta.

1. U sheeg DCS isla markaaba haddii wax isbeddel ahi ku yimaadan daboolida caymiska caafimad ee loogu tala galay carruurta ee lagu soo magacaaboy amarka taageeradaada.
2. Lacagta caddaanka ah ee taageerada caafimaad waxaa ka mid ah qayb saami gal ku ah kharashyada caafimaadka ee aan la bixinin iyo qayb qaddar xilliyeed (lacag bixin lacag caddaan ah) haddii loogu baahdo amarkaaga marka aan caymiska caafimaadka la bixin.

Haddii u amarkaaga taagero farayo in waalidka ilmaha hayaa u bixiyo hoos imaadka ceymiska caafimaadka, ama kharashyada caafimaad ee aan caymisneyn, adigu waxaad codsan kartaa in lagu siiyo adeegyada buuxda ee meelmarin taageerada ilmaha iyo.

1. Waxaad weydiisan karta in ay DCS meelmariso xilka waalidka carruurta hayaan inuu bixiyo ceymis caafimaad. DCS waxaa laga yaaba inay dhaqan geliso xilkaas iyadoo ay hadba ku xiran tahay xaaladda keeskaaga.
2. Waxaad weydiisan kartaa DCS inay ka soo qaadaan waalidka ilmaha haya qarashyada caafimaadka aan caymiska lahayn oo ay ku jiraan ceymis-la--bixinta , lacagta looga goosto bixinta ceymiska caafimaadka, iyo qaddar xilliyeedaka (premiums) sida lagi sifeynayo heerka WAC 388-14A-1020.

Haddii uu amarkaada taageeradu aanu farayn waalidka carruurta haya inuu bixiyo ceymiska caafimaadka, qayb qaddar xilliyeedka caafimaad, ama qarashyada caafimaadka ee ceymis la'aanta, siday sifeyneyso xeerka WAC 388-14A-1020, waxaad ka soo codsan kartaa DCS inay dib u eegaan keyskaada si ay wax uga beddelaan ama waxaad codsan kartaa wax ka beddelaad adigu.

Noocyada Rafcaanka

Guddiga Shirka. Guddiga shirku waa hab ay maamulka DCS ee (maxkamada ka baxsan) ay u isticmaalaan inay ku xalliyan dhowr nooc oo khilaafyaa ka mid ah, ku macneeyan ujeeddooyinka, iyo ku la caddeeyaan runta.

1. Guddiga shirku waxa uu dib u eegi karaa amarrada-maxkamadda iyo kuwa aysan amrin maxkamaddu eee la xariira keesaska taaageerada ilmaha.
2. Guddiga Shirku waxay sameeyn karaan go'aan iyaga oo aan adiga kula kulmin. Haddii aad leedahay shir, waxaad kala xajoon kartaa keyskaada maamulka DCS ee nasakhi (overrule) kara go'aammada hore ee DCS. Gudiga shirku waxa ay wax ka beddeli karaan go'aanada ay gaaraan shaqaalaha DCS, laakiin ma ay awoodaan inay wax ka beddelaan ficiillada uu sharcigu farayo.

Habsocodka Gar-Naqidda (Dhegeysi). Dhageysigu waliba waa nidaam maamuleed (maxkamad la'aan ah). Dhageysigu wuu ka rasmisan yahay (more formal) guddiga shirku laakiin rasminimadu wey ka yar tahay ficiilka maxkamadda.

1. Sharciga dowladda kaliya ayaa bixiya dhageysiga xaaladaha qaarkood. Haddii ay DCS ku siiso ogeysiin, Ogeysiiska yaa kuu sheegaya inaad xaq u leedahay inaad hesho ogeysiis. Garsoore Sharci Maamuleed (ALJ) ayaa guddoomiya dhageysiga. Garsooraha Sharci Maamuleed (ALJ) uma shaqeeyo DCS.
2. Dhageysigana, Garsooraha (ALJ) ayaa dib u eegis ku samaynaya keyskaada oo go'aan ka gaari doona waxyabaha lagu doodayo. Si aad ku joojiso in ay DCS inay meelmariso amarka taageerada ilmahaaga, waa inaad ku weydiisataa dhageysi muddo 20 maalmood gudahood ah (haddii aad ogeysiiska ku heshay Dawladda Washington dhexdeeda) amase muddo 60 maalmood ah (haddii aad ogeysiiskan ku heshay meal ka baxsan Dawladda Washington) marka laga soo bilaabo taariikhda ogeysiiskan.
 - a. Waxaad soo codsan kartaa dhagaysi ka dib xadka mudada 20 ama 60 maalmood. Hasa ahaate, DCS wey sii wadi doontaa meelmarinta amarkaas illaa iyo inta aan ka helno go'aanka dhageysiga. DCS dib kuguma ay soo celin doonto lacagaha ay kaa qaadaan muddada la sugayo go'aanka dhageysiga.
 - b. Haddii aad soo codsato dhageysiga hal sano ka dib markii aad hesho ogeysigaaga, waxaa lagaaga baahan doonaa inaad na tusto sabab wanaagsan oo aad sidaas u yeelayso (sabab wanaagsan oo aad codsigaada ula soo daahday). Garsooraha (ALJ) waxaa laga yaaba inuuusan ku oggolaan codsigaada soo daahay. Hase ahaate, waxaad xaq u leedahay in wax laga beddelo xilka amarkaaga carruurta mustaqbalka xitaa haddii aadan haysan sabab wanaagsan oo aad ku soo codsato ka soo daahitaanka dhageysiga.
3. Wxa lagu soo diri doonaa nuqul ah go'aanka Garsooraha (ALJ). Go'aanka Garsooraha ALJ waxaa ku jiri doona warbixinada ku saabsan xuquuqdaada racfaanka.
4. Haddii ay habboon ahay, DCS waxay u soo sheegi doonaan labada dhinac ee uu amarka taageero ay khuseeyo markii ay helaan codsi ku saabsan dhageysiga. Labada dhinacba wey ka soo qaybgali karaan dhageysiga.

Haddaad su'aalo qabto:

DIVISION OF CHILD SUPPORT

PO BOX 11520

TACOMA WA 98411-5520

Gudaha _____ cgoobta la wacayo _____

Dibadda _____ cgoobta la wacayoa _____

Waa la helayaa adeegyada TTY/TDD ee loogu tala galay dadka dhagaha culus amase hadalku dhibayo.

Ku booqo bartayada internetka halkan: www.dshs.wa.gov/esa/division-child-support

Qofna lama takoori karo xag shaqaaleyn, adeegyo, amase dhinacyo kale hawlaho barnaamijkan iyadoo sabab looga dhigayo jinsiyad, qowmiyad uu ka soo jeedo, millad, diin, lab/dheddig-nimo, da', amase naafanimo. Haddii la codsado, waxa la heli karaa foomkan oo hab kale u qoran.